

Warqada Wararka Rubuclaha Jiilaalka 2025

Janaayo-Maarso 2025

Xiliga Qaboobaha: Waqti la qaato nasiino, dib u milicsi, iyo dib isku danabayn

Waxaa qortay Agaasimaha Waaxda BrightSpark, Janine Meyers

Maadaamaa uu xiliga qaboobuhu soo dhaw yahay, waxa uu la yimaadaa xilligiisa nasiinada, dib-u-milicsiga, iyo dib isku danabaynta.

Qaar badan oo naga mid ah, xiliga qaboobuhu waxaa uu noo yahay wakhti aan ku hakinno, ku nasano, oo aan dib u milicsano shaqada macnaha leh ee aan la soo samaynay bartayaasheena yaryar. Haddii aad fasax qaadanayso inta lagu jiro fasaxyada ama aad sii wadato bixinta daryeelka inta uu socdo xilliga, waxaan rabnaa inaan qirno oo aan qadarinno u heelanaantaada iyo dadaalkaaga.


Xiliga qaboobuhu kuma koobna oo kaliya nasashada—waa fursad aad isku daryeelaysid, si aad ugu raaxaysato waqtiyada tayada leh ee aad la qaadato kuwa aad jeceshahay, iyo si aad dib ugu hanato tamarta aad adeegsan lahayd bilaha soo socda. Waa waqtigii aad naftaada dib u heli lahayd, dib u ogaan lahayd hamigaaga, oo aad milicsan lahayd saamaynta aad ku yeelatay nolasha carruurta aad daryeesho.

Kuwa sii wado ku mashquulsanaanta barnaamijyada ama adeegyada inta lagu jiro xilliga qaboobaha, ballanqaadkaaga joogtada ah inta lagu jiro xilligaan si qoto dheer ayaa loogu mahadcelinayaa.

Maadaamaa aan ku sii siqayno bilaha qaboobaha, xasuusnoow in tani ay tahay waqtigii aad kobcin lahayd faydaqabkaaga gaarka ah oo aad shaqadaada dib ugu soo noqon lahayd adigoo tamartaada soo cusboonaysiiyay. Haddi aad nasanayso, dib u milicsanayso, ama aad dib ula xiriirayso kuwa kugu xeeran, waxaanu rajaynaynaa in xilligaan uu ku siiyo meel aad isku noolayso oo aad dib iskugu cusboonaysiiso.

Ku raaxayso Xiliga qaboobaha qaab kasta oo adiga kuu wanaagsan, waxaan ku kulmi doonaa sannadka cusub, oo diyaar u ah inaad sii wado dhiiragelinta iyo kobcinta carruurta aad daryeesho.

Waxaan kuu rajeyneynaa xilli qaboobe oo nabad, nasasho, oo ballan fulin leh!



Daabacaadan:

Fursadaha Horumarinta Xirfadeed	2
Khibradaha Waxbarashada Kooxda ee Adeeg Bixiyaasha DHAWAAN la qoray	3
Bulshooyinka Waxbarashada Xirfada	4
YKanaalka YouTube-ka ee BrightSpark & Macluumaadka Billaha	4
Adeegyada Balaaran	5
Meet your Business Coaching THRIVE Group	6
Khayraadka	7

Fursadaha Horumarinta Xirdadaha ee Jiilaalka 2025

Rubuca Xiliga qaboobaha waxa ka buuxa fursado Horumarin xirfadeed oo cajiib leh, oo ay ku jiraan:

Taxanaha Tababarka

MAWDUUCA TABABBARKA	STARS	MAALINTA	WAQTIGA	LUUQAD	QIIMAHA
Ganacsiga Xanaanada Carruurta	20	Thursdays, Feb/13, Feb/20, Mar/06, Mar/20, Apr/03, Apr/17	6:00-8:30 PM	*English	\$75
Hordhaca Taxanaha Dhaqanka Ugu Wanaagsan	2.5 loogu talagalay kalfadhi kasta	Tuesdays, Mar/25 – Isdhexgallada Jun/03 - Hawlaha Barashada Sep/23 - Jadwallada iyo Kala-guurka Nov/04 - Afka iyo Akhris-qoraalka	6:30-8:30 PM	*English	\$60

**interpretation can be requested*

Fiiri liiskayaga buuxa ee fasallada iyo fursadaha kale addoo isticmaalaya koodka hoose ee QR-ka!



Nidaamkeena cusub ee is-diiwaan gelinta waa kan!

Kooxdaada Horumarinta Xirfadlayaasha waxay si adag uga shaqaynayaan sidii ay u abuuri lahaayeen wax iibsiga iyo habka diiwaangelinta taas oo ka sahlan in la isticmaalo sidii hore! Si aad u isticmaasho boggan cusub, si fudud u gal www.BrightSpark.org, ka sameyso akoonkaaga boggeena cusub (ha werwerin, waa inay qaadataa wax aan ka badaneyn 5-10 daqiiqo), ka dibna waxaad awoodi doontaa inaad isdiiwaangeliso. Fasaladeena Dayrta 2024 dhamaantood ku yaal boggeena cusub.



Isdiwaangali

Kaydi Taariikhda Machadka Hormarinta Xirfada ee Gu'gaan imaan doona!

Qof ahaan - Sabtida, Maajo 3 iyo
Virtual May 13, 14, 15



Khibradaha Waxbarashada Kooxda ee Adeeg Bixiyaasha DHAWAAN la qoray (GLE)

Khibradaha Waxbarashada Kooxda ayaa taageeraaya shuruudahaaga jadwalka Early Achievers. GLE yadaan ayaa ku siinaaya xog ku saabsan EA, taageerooyinka farsamo, iyo mawduucyada baahiyaha carruurta ee hagaaya higsgaaga hormarinta tayadaada.

Waxaan bixinaynaa jadwal joogto ah iyo marar badan asbuuc kasta si loo waafajiyo jadwalkaaga. La soco waxa soo socda sadexdan bilood oo ku xirnew Tababarahaaga Waxbarashada Caruurnimada Hore si aad isu diiwaangeliso!

Keydi lifaaqan zoom oo kusoo biir mid kasta oo ka mid ah kulanada liistada ku jira: <https://bit.ly/4gkgHkl>

Jan-Mar

Name	Date	Time
EA - Fadhiga Hanuuninta	Khamiis – Janaayo 09, 2025	6:30 – 8:00pm
Program Profile/CECI	Khamiis – Janaayo 16, 2025	6:30 – 8:00pm
U Diyaarsanaanta/Habraacyada Gurmada	Khamiis – Janaayo 23, 2025	6:30 – 8:00pm
WAC's Buug Tusmeedka Ruqsada	Khamiis – Janaayo 30, 2025	6:30 – 8:00pm
EA - Fadhiga Hanuuninta	Khamiis – Febraayo 06, 2025	6:30 – 8:00pm
Suuqgaynta iyo Cusbooneysiinta	Khamiis – Febraayo 13, 2025	6:30 – 8:00pm
Kheyraadka loogu talagalay Qoysaska iyo Qoraalada Loo Baahan	Khamiis – Febraayo 20, 2025	6:30 – 8:00pm
Horumarinta Xirfadeed/Shuruudaha Tababarka	Khamiis – Febraayo 27, 2025	6:30 – 8:00pm
EA - Fadhiga Hanuuninta	Khamiis – Maarso 06, 2025	6:30 – 8:00pm
Wakhtiga Cuntada/Nafaqada	Khamiis – Maarso 13, 2025	6:30 – 8:00pm
TBD	Khamiis – Maarso 20, 2025	6:30 – 8:00pm
Deegaannada	Khamiis – Maarso 27, 2025	6:30 – 8:00pm

ISKU DARKA GALABTA EE GAARKA AH - HANUUNINTA EA

Adeegso isku xirka Zoom-ka si aad ugu biirto fadhiga hoose: <https://bit.ly/3VrKzDf>

Jan-Mar

Name	Date	Time
EA - Fadhiga Hanuuninta	Khamiis – Janaayo 21, 2025	1:00 – 2:30pm
EA - Fadhiga Hanuuninta	Khamiis – Febraayo 18, 2025	1:00 – 2:30pm
EA - Fadhiga Hanuuninta	Khamiis – Maarso 18, 2025	1:00 – 2:30pm

Professional Learning Communities

BrightSpark's waxay kugu casuumaysaa inaad balaariso aqoontaada waxbarashada dhallaanka adoo ku biiraya Bulshooyinka Barta Xirfadaha (Professional Learning Communities, PLC)! PLC-daan waxaad sidoo kale ka helayaa fursad aad kula xariirto xirfadlayaasha kale ee waxbarashada dhallaanka. Nala shaqee, waydii su'aalo, oo hel khayraad! Taariikh ahaan xirfadaha bulshooyinka waxaan loo qaadan jiray si toos ah, dhowrkii sano ee lasoo dhaafay waxaa loo qaataa qaab oonleen ah. Waxaan rajaynaynaa inaan dib oga dhigno kuwo ku baxa shirar toos loo tagaayo! Inta lagu jiro waqtigaan waxaan sameyn doonaa bakhtiya nasiib dhammaadka qayb kasta oo ah PLC - sidaad oowgeed xaqiiji inaad ka qaybgasho!

Bulshooyinka waxaa si gaar ah loogu talagalay ka qaybgalayaasha Early Achievers!



Adeeg bixiyaasha Daryeelka Ilmaha Qoyska, macalimiinta Xarunta Daryeelka Ilmaha, xubnaha shaqaalaha, macalimiinta kale, iyo kaaliyaasha waxbarashada.



Fadlan ogsoonow in bulshooyinka waxbarashada ma bixiyaan saacadaha STARTS.

Isha ku hay iimayladayada PLC ee bilaha ah, waxay faahfaahinaysaa dhammaan PLC ee dhacaya bisha, oo ay weheliso oo leh taariikhahooda, waqtiyadooda, mowduucyadooda, iyo xiriirintooda zoom.

Kanaalka YouTube-ka ee BrightSpark & Macluumaadka Billaha

Weli ma aragtay kanaalkeena YouTube-ka? Halkaas waxaad ka heli kartaa macluumaadyada muuqaalkeena, bodhkastigeena tababarka iyo waxyaabo kaloo badan! Waxay faa'iido u yeelan doontaa shaqadaada.

Ka iskaangaree koodhka QR dhanka midig si aad u bilowdo inaad maanta daawato!

Sidoo kale, waxaan leenahay warside macluumaad oo bille ah halkaas oo tababarayaasheena ay meel isugu geeyaan qaybo macluumaad ah oo ku saabsan mowduucyo kala duwan.

Mawduucyadan waxaa ka mid ah waxyaabo ay ka mid yihiin; hawlaha sayniska, hawlaha fanka, sinnaanta iyo ka mid noqoshada, xirfadaha shucuurta bulshada, habdhaqannada caqabada leh iyo waxyaabo kaloo badan!

Hoos ka eeg tidbit-keenii hore!

Halloween with kids

<https://conta.cc/40e5dKj>

Thanksgiving with Kids!

<https://conta.cc/48Ljxg>

Winter Wonderland!

<https://conta.cc/3OKjsPY>



Comprehensive Services



La taageerayo caafimaadka dhimirka ee dhallaamada iyo socod-baradyada oo loo marayo Dib u jihayntu

Dib u jihayntu waa xeelad muhiim u ah habdhaqanka hagd iyadoo la taageerayo caafimaadka dhimirka ee dhallaamada iyo socod-baradyada. Iyadoo diiradda la saarayo ammaanka shucuureed iyo xeer-wadaagida, dib u hagitaanku waxay ka caawisaa carruurta yaryar inay dareemaan badbaado, la fahmayo, iyo inay awoodaan marka ay ka gudbaayaan caqabadaha ka jira deegaankooda.

Waa Maxay Dib-u-jihaynta?

Dib u jihayntu waxay ka beddeshaa dareenka ama tamarta ilmaha mid aan badbaada ahayn ama habdhaqanka aan loo baahnayn una beddesha mid aad ugu habboon, ka qaybgalka hawsha. Marka la eego dhallaamada iyo socod-baradyada, waxay u tahay hab lagu caawiyo inay maareeyaan dareemaha waaweyn iyadoo la ilaalinayo dareenka kalsoonida iyo xiriirka lala yeesho bixiyeyaasha.

Waa Maxay Sababta Dib-u-jihaynta Ay Muhiim U Tahay

- **Waxay Kor U Qaadaa Shuruucda Dareenka:** Waxay ka caawisaa dhallaamada iyo socod-baradyada inay is dejiyaan oo ay dareemaan in laga taageerayo maaraynta dareemaha.
- **Waxay Xoojisaa Cilaaqaadyada:** Waxay dhista kalsoonida u dhaxaysa daryeelaha iyo ilmaha iyadoo wax uga qabanaysa baahiyaha si naxariis iyo daryeel leh.
- **Waxay Dhiiragelisaa Sahminta:** Waxay hagtaa habdhaqanka isagoo taageeraya jawi badbaado leh, soo jiidasho leh oo waxbarasho iyo ciyaar ah.

Talooyin ku saabsan Dib-u-jihaynta Xog-ogaaleed ee Caafimaadka Maskaxda

1. **Marka Hore Ku Xirnow:** Ka bilow inaad garawsato dareenka ilmaha. Tusaale: "Waan arkaa inaad niyad jabsan tahay sababtoo ah alaabaha lagu cayaaro ma shaqaynayaan. Aynu isla ogaano."

2. **Sii beddelaadyo:** U soo bandhig waxqabad la taaban karo oo ku habboon baahida ilmaha.

Tusaale: Ku beddel tuurista alaabta lagu ciyaaro kubbadaha jilicsan.

3. **Ahaw mid dagan oo xidhan:** Isticmaal cod deggan, taabasho dabacsan, iyo joogitaankaaga si aad uga caawiso ilmaha inuu dareemo ammaan.

4. **Ku xooji Doorashooyinka:** Ikhtiyaarada fudud, la saadaalin karo waxay taageeri karaan madax-bannaanida koritaanka ee socod baradka. Tusaale: "Ma jeclaan lahayd inaad ku dhisto baloogyo ama aad ku ciyaarto xujada?"

5. **La qabso Deegaanka:** Iska yaree kicinta xad-dhaafka ah adiga oo abuuraya xasillooni, goobo dareenka saaxiibtinimo marka loo baahdo.

Dib-u-jiheentu waxay ku salaysan tahay in badan maaraynta dhaqanka; waxay ku saabsan tahay kobcinta korriinka dareenka iyo adkaysiga. Markay la socdaan baahiyahooda oo uga jawaabaan si naxariis leh, daryeelayaashu waxay caawiyaan dhallaanka iyo socod baradka inay dhistaan aasaas adag oo caafimaadka maskaxda iyo ladnaanta nololaha oo dhan ah.

Ma u baahan tahay Taageero?

Haddii aad xiisaynayso inaad ka hesho adeegyada goobta ee bilaashka ah kooxdayada Holding Hope, waxaanu halkan u joognaa inaanu ku caawino! Kooxdayadu waxay bixisaa taageero xagga baadhista korriinka, xeeladaha hab-dhaqanka, iyo agabka si gaar ah loogu habeeyey si loo daboolo baahiyaha carruurta, qoysaska, iyo daryeelayaasha.

Maanta nala soo xidhiidh si aad wax badan uga barato ama ballan u samayso booqasho! Aynu ka wada shaqayno si aynu u abuurno korineed, bay'ad taageero halkaas oo ilmo kasta iyo qaangaari ay ku kobcaan.

Mica Slater

Maareeyaha Waaxda Adeegyada Dhamaystiran
slater@childcare.org

La kulan kooxdaada socod baradka ah ee THRIVE!



La kulan Kooxdayada Saanqaadka Dhallaanka ah ee cajiibka ah - afar tababare oo xamaasad leh oo u heellan inay taageeraan kuwa daryeela carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa saddex! Tababarayaashani waxay si sax ah u keenaan khibradooda fasalkaaga iyaga oo u maraya tababbar habaysan, FIND - qalab tababbar muuqaal ah oo kaa caawinaya inaad milicsato, koraan, oo hagaajiso isdhexgalkaaga kuwa yaryar, iyo tababarka Su'aalaha Da'da & Marxaladaha. Iyada oo la adeegsanayo tababbarro ku habboon iyo agab badan, kooxdayadu waxay halkan u joogtaa inay kaa caawiso abuurista korriin, goobo loo wada dhan yahay oo taageera dhallaan kasta iyo socod baradka ku jira daryeelkaaga.



Ku saabsan barnaamijka

Waxaan siinaa kaalmo dheeri ah adeeg-bixiyeyaasha kuwaasoo xannaaneeya caruurta da'doodu tahay dhalad illaa saddex. Taageeradaan waxaa ku jira adeegyo kala duwan meelaha adeeg-bixiyeyaashu uga baahan karaan caawimaad dheeraad ah, oo ay ku jirto laakiin ku ekeyn taageero dabeecadeed, hab-dhaqamada korriimo ahaan ku habboon, iyo sidookale wixii walaac ah oo kale oo ay qabi karaan.



Tababbarka Fiidiyowga FIND

Isdhexgalka Duubista Horumarinta Kobcinta (FIND). Hab ku aadan xoogga oo lagu taageero macalimiinta dhallaanka iyo socod baradka!

Baaritaan Korriimeed

Taageero iyo caawimo si loo hirgeliyo su'aalaha ku aadan da'da iyo marxaladaha (ASQ) ee barnaamijkaaga. Waxaa dheer, saacadaha 4 STARS ee bilaashka ah ee tababbarka ASQ!



Macluumaad dheeri ah ama si aad taageero u dalbato, sawir koodka QR ama la xidhiidh:

Andrea Daniels: daniels@childcare.org

Mica Slater: slater@childcare.org



Khayraadka

Ma xiisaynaysaa inaad ku dhejiso jagooyinkaaga furan mareegahayaga intarneetka?

Waxaa jira muqaal bilaash ah oo aan ku siinayno.

Dhammaan shaqooyinka waxaa la dhajiyay muddo laba toddobaad ah, intaas ka dib si toos ah ayay u dhacayaan.



Fadlan isticmaal koodka QR si aad u soo gudbisoo boostadaada shaqada

<https://www.brightspark.org/provider-jobs/>



Scan me


To view this newsletter online in English, Spanish or Somali, use the link below or scan the QR code.

Para ver este boletín informativo en línea en inglés, somalí, use el siguiente enlace o escanee el código QR.

Si aad u aragto waraaqdaan warar oo ku baxaysa ama Soomaali, adeegso lifaaqa hoose ama iskaanka mari koodhka QR.



bit.ly/4g0hUNX



La socio Warsidaha Gu'ga!

"Ma jiro Jiilaal weligiis waaraya; ma jiro Gu'ga oo ka boodaya markiisa" - Hal Borland